

### **Waa maxay Qorshaha Koleejada Qarash La'aanta Wax lagu Barto ee Bulshada (TFCC)?**

Qorshaha Koleejada Qarash La'aanta Wax lagu Barto ee Bulshada (TFCC) ayaa bixiya ilaa saddex sano oo qarashka waxbarashada ah iyo waxbarashada dhammaan dadka daggan Boston – ayadoo loo egeeyn da'dooda, dakhliga soo gala, ama xaalada socdaalka – kuwaasi oo ka dhiganaaya koleejo aan shirko nahay waxbarashada shahaadada saddexda sano ee jaamacadeed ama waxbarasho muddo gaaban shahaado lagu qaato.

### **Waa kuwee kuleejooyinka u qalma?**

Waxaa jira lix koleejooyin oo aanu shirko nahay:

- [Benjamin Franklin Cummings Institute of Technology](#)
- [Bunker Hill Community College](#)
- [Massasoit Community College](#)
- [MassBay Community College](#)
- [Roxbury Community College](#)
- [Urban College of Boston](#)

### **Waa kuwee qarashyada la bixinaayo?**

- Dhammaan qarashaadka waxbarashada ee qasabka ah in la baxsho ee soo haray kadib marka la codsado wixii kaloo kaalmo lacageed ah ee khuseeya.
- \$250 simistar kasta ilaa saddex sano qarashaadka koleejada la xiriira (sida wixii ku baxaaya buugta iyo gaadiidka).
- Deyn dhan ilaa \$2,500 oo loogu tala galay ardayda ka qaba baaqi harsan koleejo shirko nala ah taasoo ka hortaagan arday inuu dib isaga diiwaan gasho iskoolkaas.

### **Sideen u codsadaa?**

Ardayda ayaa un u baahan inay soo codsadaan barnaamijka ay jecel yihiin koleejooyinka shirkada nala ah ayaana codsan doona qarashka taasi oo qeyb ka ah hannaankooda kaalmada lacagta ah.

### **Miyay qasab tahay inaan ahaado muwaadin Mareykan ah si aan u codsado?**

Maya, dhammaan dadka ku nool Boston ayaa u qalma ayadoon loo egeeyn xaaladooda socdaal.

### **Waa kuwee barnaamijyada ku jira?**

Barnaamij un shahaadada saddexda sano ee jaamacadeeed ah kii uu ahaadaba ama barnaamij shahaado muddo gaaban lagu qaato oo laga heli karo koleejo qeyb ka ah TFCC. Si aad wax intaa ka badan uga ogaato barnaamijyada la heli karo iyo sida loo codsado, booqo barta internetka ee ardaydu iska diiwaan galiyaan ee koleejada ku habboon.

Koorasyo kalikali ah ama koorsooyin aan qeyb ka ahayn shahaado ama barnaamij shahaado sida xiisadaha fasalka ESOL ama xiisado fasal oo sii socda uma qalma qarashka TFCC.

### **Waa maxay barnaamij muddo gaaban shahaado lagu qaato?**

Barnaamijyada mudada gaaban shaahaado lagu qaato waxay bixin karaan aqoonsiyo horseeda shaqooyin in laga helo waaxyo badan oo shaqo sida daryeelka caafimaadka, nishaadka ama tamarta la cusbooneysiin karo, iyo IT muddo gaaban gudaheed sida lix bilood gudahood in lagu helo shaqooyinkaas. Lixda koleejo ee qeybta ka ah TFCC waxay bixiyaan barnaamijyo badan oo waxbarasho oo shahaado lagu qaato. Si aad wax badan uga ogaato, la xiriir koleejada shirkada aan nahay ee arrinkaa ku habboon.

### **Waa maxay FAFSA?**

Codsiga Lacag La'aanta ah ee Kaalmada Ardayga ee Federaalka (FAFSA) waa mid lacag la'aan ah, waana hannaan onlayn ah oo ku ogeysiin doona bal in aad u qalanto kaalmo lacageed oo ku salaysan dakhli gaar ah oo loogu yeero Pell Grant oo bixisa qarashyada koleejka.

Deeqda Pell Grant waa deeq ay bixiso Waaxda Waxbarashada ee Mareykanka oo caawisa bixinta qarashka koleejka ee ardayda qaba baahida lacageed. Si ka duwan deyn ayaa deeqda Pell Grant aysan u baahnayn in lasoo gudo.

FAFSA waxaa lagu buuxin karaa waqti ka yar saacad qura.

Ka codso [studentaid.gov/h/apply-for-aid/fafsa](https://studentaid.gov/h/apply-for-aid/fafsa)

Haddii aad u baahantahay in lagaa caawiyo buuxinta FAFSA, FAFSA Day Massachusetts waa kheyri, ah barnaamij iskaa wax u qabso ah oo cawimaad siiya ardayda iyo qoysaska doonaya inay buuxsadaan FAFSA.

Xog badan ka ogoow [masfaa.org/fafsaday/](https://masfaa.org/fafsaday/)

### **Miyay qasab tahay inaan dhammeeyo FAFSA?**

Wixii khuseeya barnaamijyada shahaadada:

Ardayda u qalma kaalmada ardayga ee federaalka waa qasab inay buuxshaan oo soo gudbiyaan codsi Qarash La'aan ah oo loogu tala galay Kaalmada Ardayga ee Federaalka ama FAFSA. Haddii aad u qalanto inaad hesho deeqda federaalka ee Pell Grant sida laga soo go'aamiyo gudbinta FAFSA, taas ayaa lagu dabbaqi doonaa waxbarashadaada intaa kadibna barnaamijka TFCC ayaa bixin doona baaqiga haray. Haddii aadan u qalmin kaalmada federaalka ee ardayga ayna ugu wacan tahay xaaladaada muwaadinimo, lagaama doonayo inaad buuxsato FAFSA oo barnaamijka TFCC ayaa bixin doona dhammaanba baaqiga harsan ee qarashkaaga waxbarashada.

Hel barnaamijyo muddo gaaban shahaado lagu qaato:

Barnaamijyada mudada gaaban shahaadada lagu qaato qaarkood uma qalmaan deeqda Pell Grant. Koleej waliba oo qeyb ka ah qorshaha maamulkiisa yaa kugula talin kara bal in barnaamij shahaado muddo gaaban lagu qaato oo aad dooneyso aad u qalanto iyo in kale ama inaad u baahan tahay inaad buuxiso iyo in kale FAFSA (haddii xaaladaada socdaal saamaxdo).

**Waxaan hadaba ahay arday dhigta iskool/dugsi ah TFCC, miyaan marka heli karaa waxbarasho lacag la'aan ah?**

Maya ee adigu horaad ugaba diiwaan gashanayd iskool ah TFCC oo marka uma qalantid qarashkaan lagu bixinaayo waxbarashada.

**Meeqa sano ayuu qaadanayaa TFCC?**

Barnaamijka ayaa waxaa ku jirta waxbarasho lacag la'aan ah iyo qarash loogu tala galay ilaa saddex sano oo ay kujiraan simistarada xagaaga.

**Dhib miyay leedahay markaan casharo qaadanay inta ay ii socoto mudada saddexda sano ee TFCC?**

Markii aad bilowdo inaad hesho lacagta TFCC, waa inaad isku daydo inaad qaadato xiisadaha fasalka deyr waliba ama simistar kastoo kan gu'ga ah. Haddii aad fasax qaadato hal simistar, wali waxaad kasii diiwaan gashanaan kartaa TFCC. Laakiin xasuusnoow: waxaad un wali heleysaa ilaa 3 sano qarashkooda. Haddii aad fasax qaadato simistar, dib uma soo heli doontid qarashkii simistarkaas aad maqnayd.

Ayadoo aysan sharuud u ahayn TFCC, hadana waa inaad sidoo kale isku daydo inaad qaadato ama hesho ugu yaraan 10 buundo oo kuwa koleejka ah simistar kasta. Tani waxay kordhinaysaa fursadahaaga aad ku heleysa shahaadada saddexda sano ee jaamacadeed saddex sano gudahood. Lataliyahaaga waxbarashada ayaa kaa caawin kara sidii aad dariiqaas ugu sii socon lahayd.

**Markii qorshaha la iga aqbalo oo la igu daro, sideen u sii wadan karaa u qalmitaanka?**

Markii aad iska diiwaan galiso TFCC, uma baahnid inaad dib mar kale u codsato sanadaha soo socda. Buuxi FAFSA-gaaga sanad walba si aad usii wado helitaanka deeqda Pell grant (haddii aad uqalanto).

**Miyuu TFCC bixiyaa barnaamijyada shahaadada afarta sano ee jaamacadeed?**

Maya ee TFCC kaliya wuxuu bixiyaa qarashka ardayda dhiganaaya kooras ah shahaadada saddexda sano ee jaamacadeed ama barnaamij muddo gaaban shahaado lagu qaato. Si kastaba ha ahaatee, haddii aad malayneyso inaad dooneyso inaad sii wadato waxbarashada kadib shahaadada saddexda sano ee jaamacadeed, eeg Boston Bridge (Isku-xiridda Boston) ama barnaamijka MassArt Transfer.

Boston Bridge (Isku-xiridda Boston)

Boston Bridge waa iskaashi ka dhexeeya TFCC iyo barnaamijka Ballanqaadka Barwaaqa Sooranka Gobolka oo u saamaxa ardayda u qalanta inay helaan dhigriiga shahaadada afarta sano ee jaamacadeed oo aan lahayn qarash lagu bixinaayo oo ah kan waxbarashada iyo mid qasab ah. Wax badan oo xog ah halkaan ka ogoow.

Barnaamijka MassArt Transfer

Barnaamijka MassArt Transfer waxaa uu bixin doonaa waxbarashada, qarashka waxbarashada, iyo saadka ama sahayda loogu teela galay ardayda u qalanta xawilaada PELL ee ka imaanaysa kuleejo bulsho oo kutaal Massachusetts una soo wareegaya barnaamij shahaadada afarta sano ee jaamacadeed ah oo ah nooca bachelor's degree oo ah MassArt. Si aad xog intaa ka badan u hesho booqo [massart.edu/boston-bridge](https://massart.edu/boston-bridge) ama la soo xiriir Shannon Gallagher, oo ah Lataliyaha Diiwaangalinta Ardayda kuleej Kale Kasoo Wareegaya ee MassArt, adigoo kala soo xiriiraya iimaylkaan [sagallagher@massart.edu](mailto:sagallagher@massart.edu).

**Miyuu dhabtii yahay lacag la'aan?**

Haa! Haddii aad tahay qof daggan Boston, waxbarashada iyo qarashka ku baxaya mid kastoo ka mid ah kuloojeeyika qorshaha qeybta ka ah ee lixda ah waa lacag la'aan oo waxaa laga dhigan karaa associate degree ama barnaamijka waxbarasho ee shahaadada mudada gaaban lagu qaato.

**Waxaa ii harsan baaqi aan la bixin kuleejada bulshada dibna isuma diiwaan galin karo. Miyaad icaawin kartaan?**

Haa! Barnaamijka ayaa bixin doona deyn dhan ilaa \$2,500 oo loogu tala galay ardayda ka qaba baaqi aan la bixin kuleejo shirko nala ah haday taasi ka horjoogto dib isaga diiwaan galinta kuleejadaas. Arday daydu waa inay isu diiwaan galiyaan shahaadada saddexda sano ee jaamacadeed ama barnaamij shahaado oo waxbarasho oo kuleejkaas lagu barto.

**Waxaan isaga baxay barnaamij ay leedahay kuleejo bulsho. Miyaan dib isugu diiwaan galin karaa iskool ah TFCC si aan u dhammeeyo waxbarashadeyda dhigriiga anoo isticmaalaya qarashkaan?**

Haa! Waxaad u qalantaa waxbarasho lacag la'aan ah haddii aad dib isaga diiwaan galiso koleeho bulsho oo qorshaha qeyb ka ah.

**Waxaan barnaamijkeyga dhigriiga ka bilaabay iskool aanan ahayn TFCC. Miyaan iska diiwaan galin karaa iskool ah TFCC si aan ugu dhammaysto waxbarashadeyda dhigriiga qarashkaan?**

Haa! Waxbarashadaada aad ku qaadanayso mid ka mid ah lixda iskool ee qorshaha qeybta ka ah waxay noqon doontaa mid lacag la'aan ah haddii aad tahay qof daggan Boston. Lasoo xiriir iskoolka aad rabto ee dooqaaga ah si aad ula meel dhigto soo xawilida buundooyinkaaga.